# Ideas to Action

**PARTICIPANT WORKBOOK**





CENTER FOR ENVIRONMENTAL HEALTH EQUITY
UNIVERSITY *of* WASHINGTON

# Garwaaqsi iyo Mahad-naq

University of Washington Center for Environmental Health Equity (UW CEHE, Jaamacadda Washington Xarunta Bii'ada iyo Sinaanta Caafimaadka) waxay ku taalaa xarunta University of Washington ee Seattle waxaana garowsanahay dadka Coast Salish ee dhulkaas, dhulka taabanaya biyaha ay wadaagaan Qabaailka oo dhan iyo kooxaha ay kamidka yihiin umadaha Duwamish, Suquamish, Tulalip, iyo Muckleshoot.

Anaga oo garowsan iskudayadii is xigxigay ee dowladaha Federaalka iyo Gobolada Maraykanku iskugu dayayeen inay ku tirtiraan, oo ay kujireen ka barakicinta iyo ka rarista xoogga ah ee dadka Asalka ah dhulkooda, waxaan ku dadaalaynaa inaan qaladkaan saxno anaga oo la kaashanayna qabaailka iyo bulshooyinka qabaailka ah si loo dhiso awoodda iyo helitaanka adeegyada ayaga oo sii wadaya soo ceshashada xiriirka dhulkooda ay ayagu leeyihiin.

Mahad balaaran ayaan One Roof Foundation uga celinaynaa taageeradooda ku aadan qoreyaasha deeqda iyo saaxiibadeena ku sugan Department of Commerce (Waaxda Ganacsiga) iyo Hagerty Consulting.
Ugu danbayntii, waad mahadsantihiin bulshooyinkii iyo Qabaailkii la shaqeeyay xarunteena ilaa hadda kuwaas oo shaqadooda iyo rabitaankoodu dhiirigaliyay nuxurka siminaarkaan.

# Waxyaabaha ku saabsan Siminaarkaan iyo Buugga shaqada

Ujeedada siminaarkaanu waa in **lagaa taageero dhisidda tafaasiisha mashruuca cadaaladda bii'ada ee bulshadaada**, ama, in fikradda loo badalo waxqabad. Inta siminaarku socdo, waxaan kugu hagi doonnaa layliyo iyo howlo is xigxiga si ay kaaga caawiyaan inaad ka fakarto qaabka mashruucaanu noqon karo iyo sida loogu sheegi karo dadka dibadda ka ah ee dhegaysan doona.

Waxaan buuggaan shaqada u isticmaali doonnaa siminaarka. Dhammaystirka howlaha iyo layliyada kujira buuga shaqadu waa qaab gacan ka gaysanaya iskuduwidda afkaartiina iyo aragtida mashruuca loona bilaabi karo inaad aragtidiina uga dhiibataan soojeedinta mashruuca.

Qayb walba oo kamid ah buuga shaqadu waxay ku xirantahay qayb kamid ah codsiga deeqda ee dhabta ah:

| **Qaybta(baha) Buuga shaqada** | **Qaybta Codsiga Guud ee Deeqda** |
| --- | --- |
| Barashada Ururkaaga | Taariikhda Ururka<br>Faahfaahinta Bulshada |
| Ku xiraya Cadaaladda Bii'ada | Faahfaahinta Bulshada<br>Faahfaahinta Baahida ama Warbixinta Dhibaatada |
| Magacaabista "Waxaaga" iyo "Sababtooda" | Faahfaahinta Baahida ama Warbixinta Dhibaatada |
| Habka Macquulka ah | Tafaasiisha Mashruuca ama Fikradda Mashruuca<br>Qiimaynta ama Cabiraadda Guusha |

Qabashada siminaarku waxay fududaynaysaa shaqadaada howl walba ah. Buugaan shaqadu wuxuu bixinayaa tilmaamo iyo hagitaano gacan ka gaysanaya in fikradihiina la isu keeno. Waad u fasaxan tahay inaad buuga shaqada ku qorto fikradahaaga, macluumaadka dhijitaalka ah ee ku haboon ayaa sidoo kale lagu siin doonaa si loogu qaado macluumaadka qoran

# Shaxda Mawduucyada

WAXYAABAHA KU SAABSAN SIMINAARKAAN IYO BUUGGA SHAQADA ........ 3
FILASHOOYINKA MIDBA MIDKA KALE KA LEEYAHAY ........ 5
SHEEGISTA SHEEKADAADA ........ 6
KU XIRAYA CADAALADDA BII'ADA ........ 8
MAGACAABISTA "WAXAAGA" IYO "SABABTOODA" ........ 9
HABKA MACQUULKA AH ........ 13
ADEEGYADA TALAABOOYINKA XIGA ........ 17
AGABKA DIB U EEGISTA SHAACINTA MAALALINTA ........ 19
WAXYAABAHA KU SAABSAN UW CEHE ........ 22

# Filashooyinka Midba Midka kale ka leeyahay

Fadlan ogsoonow, waxaa jirta meel laga bilaabo wadasheekaysiga ku saabsan qaabka aan u wada shaqyan doonno. Waxaan fursad u heli doonnaa inaan ka wadahadalno aana qorno arrimahaan, sida loogu baahdo.

1. **S.U.G.: "maxay tahay sababta aan u hadlayo?" ama "sababta aanan u hadlayn?"**
2. **Sheekooyinku way soo haraan, casharadu way tagaan**
3. **"Ouch," "oops": aamin ujeedada, lahow saamayn**
4. **Hadal si laguu fahmo, dhegayso si aad u fahamto**
5. **Dadku waxay khubaro ku noqdaan waaya-aragnimadooda**

Filashooyinkaanu waxay salka ku hayaan lagana keenay Jemez Principles for Democratic Organizing iyo Defend the Sacred Alaska Principles ee Alaska Just Transition Summit.

**Majiraan waxyaabo ka maqan filashooyinkaan? Qoraal ku samee buugaaga shaqada ee dhijitaalka ah si aad kooxda ula wadaagto.**

Tiir-dhexaadka dhammaanba filashooyinkaanu waa in qofba kan kale ixtiraamo iyo waaya-aragnimada iyo hibada qof walba la imaanayo. Haddii aad dareento in qofku uusan raacayn filashooyinkaan, haddii uu yahay xubin kamid ah kooxda UW CEHE, mutadawace, ama ka qaybgale siminaarka, fadlan u sheeg mid kamid ah howl-wadeenada siminaarka waxaana isla qorshayn doonnaa siii arinkaan wax looga qaban lahaa.

# Sheegista Sheekadaada

Inta badan, soojeedinada deequhu waxay ku weydiinayaan inaad tilmaanto oo aad magacowdo awoodaha iyo waaya-aragnimada adiga iyo ururka. Ayada oo dad fara badan ay leeyihiin waaya-aragnimo iyo xikmad FARA BADAN oo ay dadka la wadaagi karaan, haddana arintaan ayaa u muuqan karta cabsigalin ah ama u muuqata in lagu faanayo. Si aan idin kaga caawino adiga iyo ururkaaga kasoo dhalaalista shaqadii aad horeyba u hayseen iyo waaya-aragnimada aad la imaanaysaan, waxaan adeegsan doonna qaab sheekooyinka loo sheego si aan kuugu tababarno sidii aad dadka ula wadaagi lahayd sheekooyinkaaga iyo kuwa ururkaaga.

Waxaa lagu weydiin doonaa su'aalo is xigxiga si ay gacan uga gaystaan hagitaankaaga la wadaagista dadka shaqadaada iyo hadafkaaga. Qaar kamid ah mowduucyada wadasheekaysigaanu waxay noqon karaan waaya-aragnimada, cabsida, rajooyinka, iyo sheekooyinka muhiimka kuu ah adiga iyo sababta aad shaqadaan u qabanayso. Ayaga oo qayb ka ah siminaarkaan, sheekooyinkaan ayaa la qori doonaa dibna laguugu soo celin doonaa si aad ugu isticmaasho sidii aad rabto – tusaale ahaan, websaytkaaga, barahaaga bulshada, ama aad ugu darto codsiga deeqda.

Inaad borofaylkaaga/faahfaahintaada nala wadaagto gabi ahaanba waa mid ikhtiyaari ah haddii aadan doonayn inaan cid la wadaagno sawiraantaada iyo/ama ereyadaada, ma samayn doonno anaga oo aan ogolaansho kaa haysan.

Miiskaaga, kaga jawaab su'aalaha hordhaca ah ee soo socda iyo ugu yaraan hal mid oo kamid ah qaybta kaydka su'aalaha. Isticmaal buugaaga shaqada ee dhijitaalka ah si aad wax ugu qorto.

**Su'aalaha Hordhaca ah:**

1. Na bar bulshadaada – ka fakir qeexitaanka bulshadaada adiga oo isticmaalaya shanta dareenwade (tusaale ahaan*. Maxaa bulshadaada la dhihi karaa? Sidee ayay u egtahay? Sidee ayaad dareentaa marka ada bulshada ku dhexjirto?* Waa maxay dhadhanka ama urka kusoo xasuusiya bulshadaada?)
2. Na bar ururkaaga ama Qabiilkaaga – waa maxay hadafkaaga iyo ujeedadaadu? Muxuu ururkaagu qabtaa? Maxaad bixisaa?

3. Na bar naftaada – kumaad tahay? Waa maxay doorkaagu? Wakhti intee le'eg ayaa qabanaysay?

**Kaydka Su'aalaha (kala bax ugu yaraan hal xabo qayb walba si aad uga jawaabto!):**

*Su'aalaha ku saabsan bulshadaada:*

1. Waa tee qaybta bulshadaada kamidka ah ee aad aadka uga fakarayso?
2. Waa maxay shayga aad inta ugu badan la jeclaan lahayd bulshadaada xiligaan la joogo?

*Su'aalaha ku saabsan Ururkaaga ama Qabiilkaaga:*

1. Waa maxay xiliga uu ururkaaga ama Qabiilkaagu ku faano?
2. Ma nala wadaagi kartaa sheeko ku saabsan wakhti ururkaagu ama Qabiilkaagu dareemayay awoodii ugu badnayd ama uu xooganaa xiligaas?

*Su'aalaha adiga kugu saabsan:*

1. Maxaa kugu soo jiiday shaqada aad bulshada u hayso?
2. Waa maxay hibada kuu qarsoon ama xirfadaha gaarka ah ee aad shaqada kusoo kordhisay?
3. Maxaad aad uga dhur-sugaysaa?
4. Yaa inta badan noloshaada kugu dhiirigaliya samaynta bulsho baraare kujirta? Noo sheeg waxa aad u rajaynayso.

# Ku xiraya Cadaaladda Bii'ada

Sidii shaqadaadu xiriir ula leedahay dhaqdhaqaaqa balaaran ee cadaaladda bii'ada? Waxaan wakhti siin doonnaa si aan u kala dhigdhigno waxa cadaaladda bii'adu kaaga dhigantahay iyo sida aad u aragto shaqadaada taageerista cadaaladda bii'ada ee bulshadaada. Inaad xaaladahaan iskuxirto waxay kaa caawinaysaa in dadka kalena kugu soo biiraan, dardargalisaan, aadna ogaataan ilaha taageeri kara shaqadiina.

Adiga iyo dadka miiska kula fadhiya, isticmaala tilmaamaha idin ku hagaya wadasheekaysiga. Waad u fasaxantihiin inaad qoraal ku samaysaan buuggiinna shaqada ee dhijitaalka ah, haddii loo baahdo.

1) Maxay cadaaladda bii'adu idin kaga dhigantahay adiga iyo bulshadaada?
2) Sawir noocee ah ayaa maskaxdaada soo gala marka aad maqasho ereyga cadaaladda bii'ada?
3) Maxay qoyskaaga, bulshada ama dhaqanku kaa bareen cadaaladda bii'ada?
4) Waa maxay caqabadaha bulshadaadu wajahdo marka loo yimaado cadaaladda bii'ada?
5) Maxay bulshadaada uga dhigantahay helitaanka cadaaladda bii'ada?
6) Sidee ururkaagu uga shaqaynayaa gaarista hadafkaan cadaaladda bii'ada?
7) Qaabab noocee ah ayuu mashruucaagu uga shaqeyya garaista hadafkaan cadaaladda bii'ada?

# Magacaabista "Waxaaga" iyo "Sababtooda"

Mid kamid ah xirfadaha ugu muhiimsan ee qorista deeqdu waa inada awoodo inaad sharraxdo baahiyaha aad bulshadaada ka dhex aragto iyo inaad faahfaahiso xalka aad soojeedinayso.

Kulankaan dhexdiisa, waxaan bilaabi doonnaa inaan kala dhigdhigno **waxa** ay tahay baahida ama dhibaatada mashruucaagu doonayo inuu wax kaqabto iyo **sababta** baahidaas ama dhibataadaasu ujirto. Waxaan isticmaali doonnaa layliga "laakiin sababtu waa maxay" si ana usoo helno asalka baahida. Waxaan adeegsan doonnaa layliga "marka maxaa dhacaya" si ana u faahfaahino sababta ay muhiimka u tahay in wax laga qabto.

Jawaabahaaga qaybtaan ee qoraalka kujira waxaa loo isticmaali karaa qaybta "Faahfaahinta Baahida" ama "Bayaanka Dhibaatada" ee codsiga deeqda.

Shaqada "Laakiin Sababtu waa maxay":

1. Adinka oo miiskiina jooga isla wadaaga baaida aad ka ogaatay bulshadaada ee mashruucaaga cadaaladda bii'adu iskudayayo inuu wax ka qabto. *Tusaale ahaan. "Hawada xaafadeena ayaa xun."* Ku qor qoraalka soogudbinta waxaadna saartaa qaybta sare ee sawirka geedka. Kani waa "jiridda" geedkaaga

2. Saaxiib ha ku weydiiyo, "laakiin sababtu waa maxay?" iskuna day inaad uga jawaabto. *Tusaale ahaan. "Waddo weyn ayaa dhexmarta xaafadeenna" ama "wax geedo ah kuma yaalaan xaafadeenna."* Su'aal walba, ku qor qoraalka lasoo gudbiyo. Kuwaani waa xididada geedkaaga. U faahfaahi sida ugu macquulsan – waxa aad waadaxa kuu ah waxaa laga yaabaa inaysan qof kale u ahayn!

3. Ku celceli arinkaan dhowr jeer. Su'aal walba, ku qor qoraalka lasoo gudbiyo oo dul saar geedka. Kuwaani waa xididada hoose ee ka baxaya xididka weyn. Jawaababahaagu waxay bilaabi karaan inay balaartaan oo weynaadaan.

   *Tusaale ahaan. "Go'aanada isticmaalka dhulka" ama "maalgashiga bulshada oo aan jirin"*

4. Adiga oo waraaqda egaya, muxuu mashruucaagu iskudayayaa inuu xaliyo? Waxay noqon karaan qodobo badan. Goobo ku geli sawirkaaga geedka ah kala niqaash saaxiibkaa.

   *Tusaale ahaan. Inaad wax ka qabato waddo weyn oo mar hore la dhisay waxay noqon kartaa mid awooddaada ka baxsan hadda. Waa suurtagal, hase ahaatee, si aad u hesho qaabab lagu hagaajin karo hawada guryaha iyo dugsiyada, adiga oo sidoo kale dhisaya awoodda dadka si ay ugu qareemaan bulshadaada go'aanada bii'ada ee mustaqbalka.*

Howsha "Marka maxaa dhacaaya":

1. Eeg baahida aad kusoo tilmaantay howshii hore (#1). Hadda saaxiibkaa haku weydiiyo "marka maxaa dhacaya?" iskuna day inaad uga jawaabto. U faahfaahi sida ugu macquulsan – waxa aad waadaxa kuu ah waxaa laga yaabaa inaysan qof kale u ahayn! *Tusaale ahaan. "Marka la barbardhigo xaafadaha kale, caruurta xaafadeena in ka badan laba jibaar ayay qaadaan cudurka neefta."* Su'aal walba, ku qor qoraalka lasoo gudbiyo. Kuwaani waa xididada kale ee geedkaaga.


2. Ku celceli arinkaan dhowr jeer. Waraaqdaadu waa inay u ekaataa sidii xuub caaro taasoo qayb badan oo isku xirxiran leh. Jawaabahaagu waxay bilaabi karaan inay balaartaan oo weynaadaan.

   *Tusaale ahaan. "Cudurka neeftu wuxuu keeni karaa dhibaatooyin caafimaad oo kale waliba, haddii uu daranyahay, wuxuu horseedi karaa in isbitaal qofka la dhigo ama geeri" ama "Caruurta neefta qabta waxay dugsiga ka maqnaadaan maalmo ka badan kuwa aan neefta qabin, taasoo saamaynaysa waxbarashadooda."*

3. Adiga oo waraaqda eegaya, waa maxay sababaha ugu muhiimsan ee talaabo loo qaadayo? Waxay noqon karaan qodobo badan. Waxay sidoo kale ku xirnaa kartaa dadka aad la hadlayso. Goobo geli arimahaan oo kala niqaash saaxiibkaaga.

   *Tusaale ahaan. Dadka dhegaysanaya ee caafimaadka bulshada qaabilsan waxaa laga yaabaa inay aad uga welwelaan saamaynta caafimaadka caruurta. Maamuleyaasha dugsiyada, macalimiinta, iyo dadka kale ee dhegaysanaya ee waxbarashada ku taxaluqa waxaa laga yaabaa inay aad uga welwelsanyihiin maalmaha ka maqnaanshaha dugsiga iyo saamaynta ay waxbarashada ku leedahay. Waalidiintu dabcan labadaba waa ay ka welwelayaan.*

Tusaale: Wasakhowga Hawada iyo cudurka Neefta




# Habka Macquulka ah


Hadda aanu dib ugu laabano waxyaabahaagii "laakiin sababtu waa maxay" iyo "marka maxaa dhacaya". Arintaani waxay kaa caawin doontaa isbadalada aad jeceshahay inaad aragto ee ay shaqadaadu sabab u tahay. Maxaad jeclaan lahayd in la hormariyo muddada dhow, muddada dhexe, iyo muddada fog? Aanu magacowno **natiijooyinkaas**.

Qaab macquul ah ayaa soo saaraya hanaaka mashruucaaga asaga oo ka bilaabanaya shaqooyin cayiman ilaa natiijada laga gaarayo. Waxaa sidoo kale loo adeegsan karaa in lagu abuuro niqaash idin dhexmara kooxdaada iyo bulshadaada si loo hubiyo in qof walba uu aragti ka dhiibto natiijooyinka iyo howlaha mashruuca. Shaxda hoose waxay naga caawinaysaa inaan isku dubaridno waxa aan qorshaynayno (howsha) iyo waxa aan qorshaynayno inaan isbadalka ku aragno (natiijooyinka) taasoo uu mashruucu sabab u yahay. Waxaad dib uga tixraaci kartaa arinkaan si aad isu xasuusiso qorsheyaashaada guud.

*HABKA MACQUULKA AH*

| Howlaha | Dhegaystaha(yaasha) | Muddada Gaaban Natiijooyinka | Muddada Dhexe Natiijooyinka | Muddada Fog Natiijooyinka |
| --- | --- | --- | --- | --- |
| | | | | |
| | | | | |
| | | | | |
| | | | | |



Waxaan marka koowaad ka bilaabaynaa dhinaca midig ee shaxda (natiijooyinka). Halkaan waa meesha aan rabno inaan ku magacowno isbadalka aan doonayno inaan aragno. Kulankaan, waxaan diiradda ku saari doonnaa natiijooyinka, laakiin waxaan qabsan doonnaa kulan gaar ah hadhow kaasoo ku saabsan noocyada howlaha halkaas aan ku gaarayno.

*Aanu ka bilowno **natiijada mudada fog.*** Waa maxay hadafkaaga kama danbaysta ah? Waa maxay isbadalka aad doonayso inaad aragto? Arintaani waxay kugu qaadan kartaa 5 sanno ama 10 sanno oo xiriir ah. Dib u eeg qaybahaaga "laakiin sababtu waa maxay iyo "marka maxaa dhacaya" si aad isu xasuusiso waxa aad jeclaan lahayd inaad aragto inay isbadaleen ama horumar sameeyeen. *Tusaale ahaan. Soo xaadirista oo soo hagaagta iyo yaraynta maqnaanshaha la xiriira cudurka naafada.*

tan xigta, waa maxay isbadalada muddada dhexe ee aad jeceshahay inaad aragto si loo gaaro natiijadaas kamadanbaysta, muddada fog ah? *Waa maxay isbadalada aad doonayso inaad aragto 1, 3, ama 5 sanno?* Kuwaani waa **natiijooyinka muddada dhexe.** *Tusaale ahaan. Yaraynta cudurka neefta, qufaca, iyo cudurada kale ee la xiriira neefmareenka ee laga qaado wasakhowga hawada.*

Ugu danbayntii, waa maxay natiijooyinka degdega ah – isbadalada ku dhici kara 6 bilood gudahood ama hal sano – ee aad u baahan doonto inaad ku aragto si aad u gaarto natiijooyinka muddada dhexe iyo kuwa muddada fog? Kuwaan waxaa loogu yeeraa **natiijooyinka muddada gaaban**. *Tusaale ahaan. Nidaamyada HVAC oo dugsiyada lagu xiro.*

Markii aad ku qanacdo natiijooyinkaaga muddada gaaban, dhexe, iyo tan fog, waxaad bilaabi kartaa tilmaamidda noocyada **howlaha** kaa caawinaya sidii aad ku gaari lahayd natiijooyinkaas.
Garo howlaha, adeegyada, dhacdooyinka ama talaabooyinka – iyo kooxaha aad rajaynayso inaad arimahaan kala xiriirto – inta mashruucaagu socdo si aad natiijooyinka u gaarto. Arimahaan waxaa lagu salayn karaa howlihii horey uga soo shaqeeyay bulshadaada dhexdeeda ama bulshooyinka kale.

Waxaan sidoo kale raadin doonnaa mowduuca **qiimaynta** – sida loo go'aamiyo in howluhu kuu wadayaan jihada natiijooyinka aad rabto iyo in kale.

**Qiimaynta:** Kaddib markii aan magacowno natiijooyinka howlaha, waxaan ka fakari doonnaa sida loo go'aamiyo in howlaha aan tilmaanay waxtar leeyihiin iyo inaan ku

gaarayno natiijooyinkeenii. Asal ahaan, sidee ku ogaan karnaa inaan samaynay wixii aan sheegnay inaan samaynayno? **Haddii aan qiimayno xili hore iyo marwalbaba, waxaan ogaan karnaa waxa shaqaynaya iyo waxa aan shaqaynayn waxaana isbadal ku samaynaynaa Habkeena Macquulka ah.**

Waxyaabaha aad doonayso inaad 'cabirto' si aad u qiimayso horumarka:

- tirada howlaha wadashaqaynta ama dadka ka qaybqaadanaya dhacdada
- kororka aqoonta arrimaha bii'ada ee xubnaha bulshada

*Tusaalaha Habka Macquulka ah*

| Howlaha | Dhegaystaha(yaasha) | Muddada Gaaban Natiijooyinka | Muddada Dhexe Natiijooyinka | Muddada Fog Natiijooyinka |
|---|---|---|---|---|
| *Bixinta cadeymo si loogu qareemo nidaamyada HVAC oo dugsiyad lagu xiro inta lagu jiro kulanka Golaha Deegaanka* | *Golaha Deegaanka* | *Nidaamyada HVAC oo dugsiyada lagu xiro* | *Yaraynta cudurka neefta, qufaca, iyo cudurada kale ee la xiriira neefmareenka ee laga qaado wasakhowga hawada* | *Soo xaadirista oo soo hagaagta iyo yaraynta maqnaanshaha la xiriira cudurka naafada.* |
| *Wadashaqayn ku saabsan tayada hawada ee fasalkooda iyo faa'iidooyinka nidaamyada HVAC* | *Macalimiinta dugsiyada iskaashatada* | | | |

Ayada oo lagu slaaynayo tusaalaha sare, waxaa laga yaabaa inaan u baahano inaan 'cabirno' waxyaabaha soo socda:

- tirada xubnaha Golaha Deegaanka ee lala xiriiray
- tirada macalimiinta dugsiyada iskaashatada ee lala xiriiray
- tirada iyo boqoleyda dugsiyada haysta nidaamyada HVAC
- boqoleyda hoos u dhaca khatarta ugu jira walxaha yaryar ee ka yimaada wasakhowga hawada ee dugsiyada soo gala
- tirada ardayda iyo shaqaalaha yeesha astaamaha neefta
- tirada dhacdooyinka wadashaqaynta

# Adeegyada Talaabooyinka Xiga

UW CEHE ayaa mar walba diyaar kuula ah adeegyada. Haddii aad danaynayso inaad nala soo xiriirto si fool-ka-fool ah, fadlan nagala soo xiriir cehe@uw.edu ama 206-543-0608.

**Linkiyada barta xogta maalgalinta cadaaladda bii'ada ee bilaashka ah:**

- Northwest Environmental Justice Center (NWEJC): https://nwejc.org/find-funding
  - Bartaan xogta waxaa kujira fursadaha maalgalinta gaarka ah, gobolka, qabaailka, iyo federaalka ee loogu talagalay mashaariicda cadaaladda bii'ada ee kajira AK, ID, OR, & WA
- FundHubWA: https://fundhub.wa.gov/
  - *Bartaxogta waxaa maalgalisay oo maamusha* Washington State's Department of Commerce ee fursadaha maalgalinta gobolka iyo federaalka ee cimilada iyo tamarta nadiifka ah National TCTAC Grant Database: https://www.ejtctac.org/grants
  - Bartaan xogta waxaa kujira fursadaha maalgalinta federaalka ee loogu talagalay mashaariicda cadaaladda bii'ada ee waddanka oo dhan
- Diiwaanka Mmaalgalinta Qabaailka: https://www.tribalfunding.org/
  - Bartaan xogta waxaa laga keenay Hozhonigo Insititute waxaana loogu tala galay Qabaailka iyo ururada ana faa'iido doonka ahayn ee dadka Asalka ah hogaaminayaan

**Liiska iimaylada waxtarka leh ee aad ku biirayso iyo ilaha helitaanka fursadaha:**

- Fursadaha maalgalinta ee federaalka:
  - Environmental Protection Network Fursadaha Maalgalinta Federaalka iyo Hagitaanka laba-todobaadlaha ah iimayl: https://www.environmentalprotectionnetwork.org/federal-funding-opportunities-guidance-updates/
  - Bogga ilaha dadka deeqaha ka raadsnaaya Environmental Grantmakers Association: https://ega.org/grant-seekers
- Fursadaha maalgalinta ee Washington:

- Department of Commerce Deeqaha Tamarta Nadiifka ah:furo warbixinada ugu dabeeya ee ku saabsan fursadaha maalgalinta waxaadna doorataa  “clean energy grants”("deeqaha tamarta nadiifka ah"): https://public.govdelivery.com/accounts/WADOC/subscriber/new

# Agabka Dib u eegista Shaacinta Maalalinta

Agabkaan waxaa loo smaeeyay inuu kaa caawiyo shaacinta maalgalinta si loo eego inay ku haboonyihiin ururkaaga. Kahor inta aadan wax codsan, ururso macluumaadka shaxda hoose kujira waxaadna isweydiisaa su'aalaha bogga xiga. Haddii aad go'aansato inuu jiro shay ku haboon ururkaaga, hubi inaad akhriso Codsiga Arjiga ama Ogaysiiska Fursada Maalgalinta si taxaddar leh kahor inta adana codsi diyaarin.

| | | |
|---|---|---|
| Magaca Fursadda Maalgalinta | *Tusaale ahaan. Deeqda Awoodda Bulshada ee HEAL Act (Xeerka Bii'ada Caafimaadka u leh Cid walba)* | |
| Linkiga | *[https://doh.wa.gov/community-and-environment/health-equity/environmental-justice/grants/community-capacity](https://doh.wa.gov/community-and-environment/health-equity/environmental-justice/grants/community-capacity)* | |
| Caddadka | *$250,000-500,000* | |
| Dhulka Diirada la saarayo | *Gobolka Washington* | |
| Taariikhda kamadanbaysta ah | *Maajo 5, 2024 saacada 11:59habeenimo* | |
| Muddada Maalgalinta | *Taariikhda fulinta – Juun 30, 2025* | |
| Nooca Maalgalinta | *Gobolka* | |
| Codsadeyaasha U qalma | *Ururada bulshada ee haysta aqoonsiga 501(c)3 ayaa u qalma inay codsadaan maalgalinta mashruuca ayaga oo kalgood ama hogaaminaya codsiga, waxayna la kaashan karaan ururada maaliayad ahaanta loo maalgaliyo.* | |
| Muhiimadaha Maalgalinta | *Barnaamijkaan deeqda awoodda HEAL wuxuu diirada* | |

| | | |
|---|---|---|
| | *saarayaa sare u qaadista go'aangaarista bulshadu hogaaminayso so loo hagaajiyo cadaaladda bii'ada (EJ) loona dhiso u adkaysiga cimilada.* | |
| Howlaha U qalma | *Deeqda mashruuca waxaa loo isticmaali karaa in lagu dhiso awoodda bulshada si ay uga qaybqaadato howlaha HEAL Act. Maalgalintu waxay xoojin kartaa howlaha ay kamidka yihiin, walow aysan ku koobnayn dhisidda awoodda si loo siiyo hagitaanka iyo ka aragti dhiibashada:*<br>- *wakaalada fulinaya HEAL Act,*<br>- *Golaha Cadaaladda Bii'ada ee fulinaya HEAL Act, iyo*<br>- *Waaxda Caafimaadka ee qaabilsan akhbaaraadka khariiradda dhibaatooyinka caafimaadka bii'ada.* | |
| Waraaq Go'aan ah ma loo Baahanyahay? | *Maya* | |
| Iswaafajinta Maalgalinta ma loo Baahanyahay? | *Maya* | |

Kaddib markii aad dib u eegto shaacinta maalgalinta, isweydii su'aalaha soo socda:

1. Ururkaygu **ma u qalmaa inuu codsado**?
2. Mashruucaygu ma ku haboon yahay **muhiimadaha maalgalinta?**
3. Fikradda Mashruucaygu ma ku haboon tahay **howlaha loo baahanyahay**?
4. Wakhti intee le'eg ayaan u babahanahay inaan ku diyaariyo codsiga kuna soo gudbiyo waraaqda go'aanka kahor inta aan **wakhtigu dhammaan**?
5. *Ururkaygu awood ma u leeyahay inuu mashruuca ku dhamaystiro **muddada maalgalinta**?*

6. Ururkaygu awood ma u leeyahay inuu maamulo **maalgalinta noocaan ah**?
7. *Haddii iswaafajinta maalgalinta loo baahdo, ururkaygu ma haystaa **maalgalinta iswaafajinta**?*
8. Ururkaygu waligiis ma cdsaday **maalgalinta noocaan ah?** Ma u baahanahay inaan akoon samaysto ama aan wax diiwaangaliyo? (ex. Sam.gov federaalka, Statewide Vendor Number gobolka Washington, iwm.)

Haddii aad **haa** kaga jawaabto su'aalaha kore, waxay u dhowdahay inaad ku haboontahay! Wixii intaa ska danbeeya, waa muhiim inaad akhriso Request for Applications (Codsiga Arjiga) ama Notice of Funding Opportunity (Ogaysiiska Fursada Maalgalinta) si taxaddar leh kahor inta aadan waraaqda go'aanka ama codsi soo dirin.

# Waxyaabaha ku saabsan UW CEHE

University of Washington Center for Environmental Health Equity (UW CEHE) waa xarun loogu tala galay caawimaadda farsamada caafimaadka bii'ada taasoo u adeegta ururada bulshada, ururada qabaailka, iyo Qabaailka Gobolka Washington.

UW CEHE waxaa la daahfuray 1 Juun 2023 asaga oo ahaa Thriving Communities Technical Assistance Center (TCTAC, Xarunta Caawimaada Farsamada Bulshada Kobcaysa) waxaana maalgalisay United States Environmental Protection Agency (US EPA, Wakaaladda Ilaalinta Bii'ada ee Maraykanka) iyo Department Of Environment (DOE, Waaxda Bii'ada) si ay caawimaad farsamo oo cadaaladda bii'ada iyo tamarta ah u siiso kooxaha kajira Alaska, Idaho, Oregon, iyo Washington. Kaddib markii ay bixisay in ka badan 400 oo kiisas caawimaadda farsamada ah, ayada oo ururada bulshada ka caawisay ururinta in ka badan $32 milyan oo maalgalinta shaqadooda ah, ayada oo kala bar maalgalinta loogu shaqaynayo bulshooyinka biyiga iyo goobaha fogfog degen, maalgalintii barnaamijka TCTAC ayaa loo joojiyay si dhakhso ah oo aan xiligiisii la gaarin taariikhdu markay ahayd Maajo 2, 2025 sabab la xiriirta isbadalada ku yimid muhiimadaha federaalka. Isbadaladaan dartood, xarunteenu waxay hadda diiradda saari doontaa kaalmada qorista deeqda caafimaadka bii'ada ee loogu tala galay ururada bulshada, ururada qabaailka, iyo Qabaailka degen Gobolka Washington.

Intaas waxaa dheer, waxaan la shaqaynaa Northwest Environmental Justice Center, saaxiibka TCTAC oo degen Portland, OR. Waxaad macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan saqadooda iyo xaaladooda hadda ka heli kartaa: https://nwejc.org

Si aad wax badan uga ogaato UW CEHE, booqo websaytkeena deohs.washington.edu/cehe/ or connect with us at cehe@uw.edu or 206-543-0608.